

## Cunugaaga wuxuu xaq uleeyahay inuu dhigto dugsiga barbaarinta

### 1. Maxaa cunugaygu ugalayaa dugsiga barbaarinta?

- Dugsiga barbaarintu waa meel caruurta kuciyaaraan, saaxiibo kuyeestaan, ayna kubartaan xirfado bulshonimo iyo kuwo aqoneed.
- Cunugaaga wuxuu baranayaa luuqada Norwegianka wuxuuna laqabsanayaa dhaqanka Norwegianka. Inuu dhigto dugsiga barbaarintu waxay udiyaarinaysaa cunuga inuu iskuulka bilaabo.

### 2. Cunugaaga amaan makuhelayaa dugsiga barbaarinta?

Haa. Dhamaan caruurta way amaan qabaan waxaana sifiican udaryeela dad waawayn oo xirfad khibradeed leh.

### 3. Sidee ayaan ku ogaan karaa in cunugayga uu hormar kugaaraayo dugsiga barbaarinta?

Waxaad sidhaw iskugu xirnaanaysaan shaqaalaha kashaqeeya dugsiga barbaarinta. Siwadajir ah, waxaad isla go'aaminaysaan waxa uwanaagsan cunugaaga.

### 4. Sidee ayaan boos ugu heli karaa cunugayga dugsiga barbaarinta?

Qofka aad lasoo xariirayso [... **gali magaca iyo macluumaadka lagalaso xariiraayo qofka...**] oo kashaqeeya dawlada hoose ayaa kaacaawinaaya codsashada boos cunugaaga laga siiyo dugsiga iyo xisaabinta qiimaheeda.

### 5. Waa intee qiimaheedu?

- Cunugaaga waxaa lasiin karaa 20 saacadood oo bilaash oo joogi karo dugsiga barbaarinta asbuuciiba.
- Hadaad tahay qof danyar ah, waxaad xaq uyeelan kartaa in qarashka waalidka lagaa dhimo.
- Hadaad caruur kabadan hal kuudhiganayaan dugsiga barbaarinta, waxaa lagu samaynayaa qiimo dhimis.

***Sii cunugaaga biloow wanaagsan!***